**GOLAHA DEEGAANKA BRISTOL**
**(AVONVALE ROAD, MARSH LANE AND PILEMARSH, EASTON, LAWRENCE HILL, ST. GEORGE CENTRAL, ST. GEORGE TROOPERS HILL AND ST. GEORGE QAYBAHA GALBEEDKA, MAGAALADA BRISTOL) (HAADADKA BASASKA LOO GAARYEELAY)**
**AMARKA 202-**

Golaha Degaanka ee Bristol (halkan ka dib loogu yeedhi doono "Golaha") iyagoo adeegsanaya awoodahooda ku xusan qaybaha 1(1), 2(1) illaa (3) iyo 4(1) ee Xeerka Xakamaynta Isku-socodka Gaadiidka Wadooyinka 1984 qaybtiisa wax laga beddelay (halkan ka dib loogu yeedhi doono "Sharciga 1984") iyo dhammaan awoodaha kale ee ay leeyihiin, ka dib markii ay la tashadeen taliyaha ciidamada booliska taas oo waafaqsan Qaybta III ee Jadwalka 9aad ee Xeerka 1984, ayay halkan ku soo gudbinayaan amarkan soo socda:

Dhaqangalka iyo magaca

1. Amarkani wuxuu dhaqangeli doonaa ####### waxaana lagu magacaabi karaa Golaha Deegaanka Magaalada Bristol (Avonvale Road, Marsh lane and Pilemarsh, Easton, Lawrence Hill, St. George Central, St. George Troopers Hill and St. George West Wards, Magaalada Bristol) (Haadadka Basaska Loo Gaaryeelay) Amarka 202-.

Fasiraad

2. (1) Amarkan:-

“**gaariga ogolaanshaha haysta**” waxa loola jeeda gaari la siiyay warqad ogolaansho ah oo ay soo saareen Goluhu (ka dib marka la helo codsiga lagu faahfaahiyay amarkan);

"**bas**" waxa loola jeedaa:-

(i) gaari kasta oo loo sameeyay ama loo habeeyay si uu u qaado in ka badan 8 rakaab ah (oo aanu ku jirin darawalka); iyo

(ii) bas kasta oo maxalli ah;

“**haadka baaska 1**” waxa loola jeeda qaybta waddada **Avonvale Road** ee lagu magaacaabay **HAADKA BASKA 1** ee qorshaha **RS21031-EBLN-BG-01** ee halkan ku lifaaqan;

“**haadka baaska 2**” waxa loola jeeda qaybta waddada **Pilemarsh** ee lagu magaacaabay **HAADKA BASKA 2** ee qorshaha **RS21031-EBLN-BG-02** ee halkan ku lifaaqan;

“**haadka baaska 3**” waxa loola jeeda qaybta waddada **Pilemarsh** ee lagu magaacaabay **HAADKA BASKA 3** ee qorshaha **RS21031-EBLN-BG-02** ee halkan ku lifaaqan;

“**haadka baaska 4**” waxa loola jeeda qaybta waddada **Marsh Lane** ee lagu magaacaabay **HAADKA BASKA 4** ee qorshaha **RS21031-EBLN-BG-03** ee halkan ku lifaaqan;

"**waddo laami ah**" waxaa loola jeedaa dariiq ka kooban laami wayn kaas oo ah dhabbo dadku u isticmaali karaan inay baabuurta ku wataan;

"**Sarkaal taraafii madani ah**" wuxuu leeyahay macnaha ku qoroan qaybta 76 ee Xeerka

Maareynta Isku-socodka Gaadiidka ee 2004;

"**Warqadda**ogolaanshaha" waxaa loola jeedaa warqad uu Goluhu soo saaray oo loogu talogalay amarkan taas oo u ogolaanaysa gaari cayiman ('gaariga ogolaanshaha haysta') inuu maro haad baska 1, haadkabaska 2, haadka baska 3 iyo haadka baska 4;

"**qalab isgaarsiinta elektaroonika h**" waxa loola jeedaa qalab ka kooban ama la rabo inuu ka koobnaado shebekad isgaarsiineed **elektaroonik** sida ku qeexan Xeerka Isgaarsiinta 2003;

"**Sharci dejin**" waxaa loola jeedaa sharci kasta ha ahaado mid guud ama mid maxalli ah oo ay ku jiraan amar, xeerhoosaad, sharci, xeer nidaamiye, qorsh sharciyeed, nidaam ama xeer kale oo ku dhaqangalaya marka la mariyo habka sharci dejinta.

"**alaabo**" waxaa loola jeedaa alaabo nooc kasta oo ay tahay ha noqoto mid nool ama aan noolayn waxana ka mid ah baakadaha boostada oo nooc walba leh;

"**bas maxalli ah**" waxaa loola jeedaa gaari adeeg dadweyne kaas oo loo isticmaalo bixinta adeegyada maxaliga ah oo aanu ku jirin basaska dalxiisa ama safarka ku yimi;

"**adeegga maxalliga ah**" wuxu leeyahay macno la mid ah midka ku qoran qaybta 2 ee Xeerka Gaadiidka 1985;

"**Mooto"**waxaa loola jeedaa gaadiid mishiin ku socda (kuma gaari curyaanadu) oo leh wax ka yar 4 taayir, kaaas oo miisaankiisa faaruqa ah aanu ka badnayn 410 kiile;

"**gaadhi**" waxaa loola jeedaa gaadiidka leh mishiin uu ku socdo ee loogu talagalay ama loo habeeyay inuu waddooyinka isticmaalo;

"**baaskiil lugeed**" waxaa loola jeedaa baaskiil hal-luglay, baaskiil laba-lugay, saddex-lugey ama baaskiil leh afar iyo wax ka badan oo lugood, taas oo aan isticmaalin mishiin si ay u socoto illaa iyadoo ah baaskiil isticmaasha koronto oo aan loo isticmaalin gaari matoor leh ahaan marka la eego Xeerka 1984; iyo

"**saarkaal bulsheed booliska kaaba**" wuxu leeyahay macno la mid ah midka ku qoran qaybta 38 ee Xeerka Wax-ka-baddalka Booliska 2002;

"**baakad boosto**" waxay leedahay macno la mid ah midka ku qoran Xeerka Adeegyada Boostada 2000;

"**bixinta adeegga boostada ee caalamiga ah**" waxay leedahay macno la mid ah midka ku qoran Xeerka Adeegyada Boostada 2000;

"**gaadiidkaadeegga dadweynaha"** wuxuu leeyahay macne la mid ah ka ku qoran qaybta 1aad ee Xeerka Gaadiidka Rakaabka Dadweynaha 1981;

"**Shuruucda**" waxaa loola jeedaa Xeerarka Calaamadaha Gaadiidka iyo Tilmaamaha Guud ee 2016;

"**mooto soolane ah**" waxaa loola jeedaa mooto aanu gaadhi ku dhinac xirnay;

"**tagsi**" waxaa loola jeedaa gaadiidka haysta shatiga ku xusan qaybta 37 ee Xeerka Faqradaha Booliska Xaafadda ee 1847 ama si waafaqsan sharci kasta oo la mid ah; iyo

"**adeeg bixinta caalamiga ah**" waxay leedahay macno la mid ah midka ku qoran Xeerka Adeegyada Boostada 2000.

(2) Marka la eegayo amarkan gaadhiga waxa loo tixgelinayaa inuu sugitaan ka badan laba daqiiqo sameeyay haddii qayb ka mid ah gaarigaas ama rarka uu sido (waa haddii uu rar sidee) ay kor taagnaato hal meel oo waddada ka mid ah guud ahaan muddada labada daqiiqo ka badan iyada oo aan loo eegayn in gaadhigu muddadaas dhaqdhaqaaqyo yaryar sameeyay.

(3) Sharci kasta oo lagu dhex xuso amarkan waa in loo fasirto sharcigaas oo isku dhan iyadoo la tixgeliyo wax ka baddal, dhaqangelin, midayn, dib u gudbin kasta oo sharciga lagu sameeyay ama iyadoo la fiirinayo saameynta sharciyada kale ee sharciga laga hadlayo gadaashiis la gudbiyay.

<u>Haadadka baska</u>

3. Marka laga reebo sida ku xusan qodobka 4aad ee amarkan qofna looma ogola inuu isaga oo aan amar ama ogolaansho ka haysan sarkaal taraafii madani ah, sarkaal bulsheed kaabaya booliska, booliis labbisan, soo geliyo ama u ogolaado inay soo galaan gaari aan ka ahayn bas, baaskiil baytaleey ah, mooto aan gaari ku xirnanay, tagsi, gaadhi adeeg dadwayne ama gaadhi kale oo ogolaansho haysta **haadka baska 1**, **haadka baska 2**, **haadka baska 3** iyo **haadka baska 4**.

<u>Ka dhaafitaano</u>

4. (1) Ma jiraan wax ku qoran qodobka 3aad oo qofna sharciyan ka hor istaagaya inuu gaari soo geliyo ama ogolaado in la soo geliyo **haadka baska 1**, **haadka baska 2**, **haadka baska 3** iyo **haadka baska 4** isagoo gaarigaas ka soo galaya una socona jiho kasta oo si macquul ah ugu sahlaysa in gaariga loo isticmaalo ujeedooyinka ku xusan faqradda (2) ee Qodobkan, ama inuu wax ku sugo haadka baska ee laga hadlayo muddo kasta oo lagama maarmaan u ah mid kasta oo ujeedooyinkaas ka mid ah.

(2) Ujeedooyinka lagu sheegay farqadda (1) ee qodobkan waa:-

(i) saarista wax kasta oo xannibaya isku socodka gaadiidka;

(ii) adeegyada booliska, gurmadka degdega ah iyo dabdamiska ama adeegga amabalaasta oo gudanaya waajibaadkoodii rasmiga ahaa:

(iii) gaari shil iska ilaalinaya;

(iv) hawlaha la xiriira dhisme, hawlo warshadeed ama dumineed ka socda dhulka ku xiga haadadka baska ama wax laga soo saarayo dhulka ama dhismayaasha ku xiga haadadka baska, kuwaas oo ogolaanshaha qoran ee Golaha loo haysto;

(v) adeegga hay'adaha maxalliga ah, Wakaaladda Deegaanka, shaqaalaha ka shaqeeya tubooyinka biyaha, ama kuwa bulaacadaha oo qabsanaya waajibaadkooda sharciyeed ama shaqo ama hawl la xiriirta bixinta adeegyada gaasta ama korontada ama hawl la xiriirta adeeg qalab isgaarsiineed oo

waafaqsan Xeerka Isgaarsiinta 2003; iyo

(vi) hawlaha la xidhiidha nadaafadda laamiga ama qaadista qashinka xaafadaha ee uu qabto Goluhu.

<u>Warqadaha Ogolaanshaha</u>

5. (1) Marka uu helo codsi gaari cayiman, Goluhu wuxu soo saari karaa warqad ogolaansho wuxuna ku xidhi karaa shuruudaha iyo xaaladaha ay u arkaan inay ku habboon yihiin.

(2) Warqadda ogolaanshaha waa la burin karaa waqti kasta oo ay Golahu iskood u gartaan waana inay islamarkaasba noqotaa mid aan shaqaynayn. Wargelinta burinta noocan ah waa inay noqotaa mid qoraal ah.

6. Haddii ay dhacdo in qodob ku jira amarkani ka hor yimaado qodob ku jira ama ku dhaqangalay Xeerka 1984, kaas oo ku tacaluqa mamnuucidda iyo xayiraadda sugitaanka baabuurta ama ka dhaafista xayiraadda, qodobkaas ku jiraa amarkan ayaa la raacaya oo awoodda yeelanaya.

Shaabadda Guud ee Golaha Degaanka Bristol ayaa lagu dhuftay -- Maalinta --------- 202-.

SHAABADDA GUUD EE GOLAHA DEGAANKA MAGAALADA BRISTOL ayaa lagu ansixiyay iyadoo uu goob joog yahay:-

Agaasimaha Adeegyada Sharciga iyo Dimuqraadiyadda